Vetlanda

2019-07-01

Heshiiska ka amaahashada qaybta qalabka dijitaalka ah

- Amaahbixiye: skoolka ardayga dagmada Vetlanda, oo hoos ku qoran skoolku yahay
- Amaahqaate: Arday ka diwaan gashan skoolka hoose ama skoolka hoose ee ay dhigtaan ardayda caqliga dhiman, skoolka sare ama skoolka sare ee ay dhigtaan ardayda caqliga dhiman.
- Qalabka dijitaalka: aybaadhka(ipad) kombiyuutarka ama karowmbug(chromebook) iyo qalabayada lasocda sida (jaarjarka, galka yare ee xafida si uu u jabin iyo barnaamujda kujira)

Hordhac

Degmada Vetlanda ayaa uu soo bandhigaysa ardaydeeda qorshe ay qalabka dijitalka ah ku haysan karan xitaa waqtiga iskoolka ka baxsan inta lagu gudojiro xilli dugsiyeedka ay ardaydu ka diwaan gashantahay mid ka mida iskoolada degmada.

Ujeedada laga leyahay dayminta qaybta dijitaalka ayaa ah in lasiiyo ardayda fursad siman oo ku socota isbadalka qaabka nolosha shaqada iyo fursada ay ku hormariyaan tartanka xoogan ee dhinac aqoonta dijitaalka, waxbarashada mustaqbalka iyo nolosha shaqada.

Si arday kasta u helo cadaynta ama saxeexida in uu godomay qalabka dijitaalka ah taas o ay xitaa ardaydu ku siticmaali karaan gurigooda waxaa lobahanyahay in ardayga iyo waalidka ama qofka ka masuulka ah iyo ardayga qaangaadhka ah inay si fiican u akhristaan oo ay masuuliyad iska saaran siday u illaalin lahaayen qanunka daynsahada qalabka dijitaalka. Aradygu wuxuu ballan qaadayaa inu raacayo shuruudaha hoos ku qoran iyo inuu fahansanyahay am ogyahay in uu skoolku xaq uleeyahay inuu ka ceshan karo qalabka dijitaalka ah hadii la raaci waayo qawaaninta daynsashada. Hadii aan la dooran in qalabka tijitaalka laga daynsado dugsigu wuxuu bixinayaa cutub loogu talagalay ardaydga casharrada loo baahan yahay.

Mudada daynsashada

Daynsada qalabka dijitaalka waxay soconeysaa muddada uu ardagu ka diwaan gashanyahay skoolka. Waa inaa waqti fiican laso celiyaa qalabka dijiatalka ah inta aanu iskoolku dhamaamin falsak 3, 6 iyo 9 ama markay waxbarasha dugsiga sare dhamaato. Hadii ardaygu joojiyo waxbarasha dii lo qorsheeyay mar hore ama laga xidho oo laga saaro diwaanka skoolka waa in sida ugu dhakhsaha badan loo so celiyaa iyadoon lagu odhan so celi. Markay dhamaato mudada daynsashadu waa in u qalabka dijitaalku marka laga reebo duugawga cadiga ah, waa in uu umuuqda mid dhamaystiran oo shaqaynay.

Isticmaalka iyo dayactirida

- Qalabka dijitaalka markasta waa in aad indhaha ku haysaa oo aad ilaalisaa. Haddii aysan suurtagal ahayn in lagu qufulo ardayga armajadiisa ama fasalka. Tani macnaheedu waa in tallaabooyinka ammaank qalabka laga taxadiro , ragitaankiisa ama cimridheeridiisa, qiimaha iyo xatooyada tuugada, sidaa darteed dhaawac iyo khasaaro/ lumid laga ilaaliyo sida ugu fog ee suurtogalka ah. Marka laqaadayo qalabka dijitaalka waa in markasta lagu ridaa boorsada.
- Qalabka dijitaalka wa inaan la dhigin meel aan indhaha lagu hayn ama la dayoco oo aan ladayac tirin.
- Qalabka dijitalka waa inaan la kirayn ama inaanu qofku sii daymin qof kale, inaan la iibin, inaan la rahmin am aan lagu wareejin ama aanu ku tasarufin qof kale aan ka ahayn ardaygii saxeexay. (Taa macneheedu waxay tahay in uu ardaga la daymiyay ipadka ama chromebooka uu u isticmaali karo wabarashada kalay oo anu xaq ulahayn inu iibiyo ama daymiyo, rahmo ama uu qof kale ku tasarufo).
- Ardagu isaga ayaa ka mas,uula inu qalabka dijitaalka skoolka uso qaato malmaha skolka o dhan aan ka ahayn malmaha dibdada la,aadayo sida duurka iyo wixii lamida. Qalabku waa inu markasta jarjarku buuxo bilawga maalinta dugsiga. Ardaygu waa inu qalabka u qaato guriga marka maalinta skoolku dhamaato. Marka fasaxyada ama ardaygu fasax qaato waa in qalabka dijitaalka lagu xafida ama argaygu gurigiisa dhigaa. Qalabkan dijitalka waa inaan loo qaadan wadanka dibadiisa.
- Qalabkan dijitaalka waxaa lo isticmaali karaa hawlaha waxbarasho oo kaliya. lama oggolo in lo isticmaalo qalabkan qaab ka so horjeeda sharciga iskoolka ama qaanunka dajisan. Gaadiidka internetka ayaa la diwaan galiyaa amniga qof walba. Dhaqdhaqaaqa rabshadaha, tusaale ahaan xaq gudub dhinac khayraad sisteemka iyo in lasku dayo in lajabiyo sharciga iyo qaabeynta marna lama oggolo.

Akawnaka ardayga

Aradaygu wuxu fursad u helayaa inu istimaalo internetka iskoolka isago adeeg sanaya akawnkiisa gaarka u ah. Ardaygu wuxuu yelanayaa e-postadress u gaar ah iyo 0365. Akawnka ardayga waa mid u gaar ah isagaa ayaana ka mas,uula inu qof kale la isticmaalin akawnkiisa.

Barmaamijka softwareka,rakibaada iyo raad raaca

Qalabka dijitaaka ah waa mid heer qalabaysnayn ah. Baraamijyada iyo wixii kale dheeraada ah ee ku jira (ka mid ah) waxbarasha waa lagu dajinaya hadii lo baahdo. Ardagu wuxuu mas,uul kayahay inay dhicin ama lagu so dajin wax mamnuuc ha ama koobiyada sharci darada ah softwareka qalabka dijitalka ah.

Adeega

Haddii ay dhacdo dhibaato ama wixii su'aalo ah ardayga iyo walidku ama qofka ka mas,uulka ahi waxay la xidhiidhayaan qofka u qaabilsan skoolka dayminta qalabka dijitaalka ah. Degmada Vetlanda ayaa saxiixday taageerada iyo

heshiisyada adeegga ee alaab-qeybiyaha, taas micneheeda oo ah in in qalabka dijitaalka ah uu u baahdo in loo diro adeeg.

Dhaawaca iyo lumitanka

Badi qalabka digitaalka ahi wuxuu ku xiranyahay bog lagu maamulayo hawlo kala duwan. Hadii ay dhacdo in uu dhaawacmo ama lumo qalabka dijitaalka ahi muddada amaahda waa in isla markiiba la wargaliyaa (loo sheegaa) qofka u qaabilsan skoolka dayminta qalabka. Qalabka dijitalka ayaa laga dhigayaa mid aan la isticmaali karin. Hadii laxado qalabka ardayga iyo waalidka ama qofka masuulka ka ah waa inay pooliska wargaliyaan(sheegaan) isla markaana ay iskoolka keenaan koobi waraqad ay ku qoran tahay warbixinta xaditaanka. Warqadaaso bolisku bixiyo marka lawargaliyo.

Baaritaanka dhacdada

Haddii ay dhacdo dhaawac ama lumitaan baaritaan ayaa had iyo jeer la fuliyaa waxii dhacay iyo say udhaceen halakas o ay ardayga iyo walidka ama qofka ka masuulka ah ardayga waa inay ka caawimaad galaan. Haddii baaritaanku muujiyo dayacaad waxa laga yabaa in ardaygu ku qasbanaado inuu bixiyo magdhaw sida uu qabo sharciga magdhawga. Kiiskana waxaa lagu baarayaa iyada oo lagu salaynayo sharciga rayidka. Waalidka am qofka ka masuulka ah qofkaan qaangaadhka ahayn arday ama ardayga qaangaadhka waxaa laga yaabaa in lagu soo oogo in uu bixiyo inta u dhaxaysa 1000 ilaa iyo 6000 o karoon iyada oo ku xiran aaladda dijitaalka ah moodelkeeda iyo da,deeda. Waalidka ama qofka ardayga ka masuulka ah ama ardayga qaangaadhka ah wuxuu mas'uul ka yahay wargelinta shirkad caymiskooda ah si loo daboolo (loobixiyo) sheegashada magdhowga degmada.

Hadii ay dhacdo inu qalabka dijitaalka ah dhaawacmo ama lumo ardayga waxaa la dayminayaa mid udhigma qalabkii hore intuu skoolka joogo inta badhitaanku dhamaanayo. Marka baadhitaanku dhamaado ardayga waxaa la dayminayaa mid kale oo cusub oo qalabka dijitaalka ah.

Haddii tilmaamaha aan la raacin

Skoolka wuxuu xaq u leeyahay in uu galo akawnka uu baaro waxyaabaha ku jira qalabka dijitaalka ah hadii laga shakiyo dembiyo amni ah iyo dembiyada ka soo horjeeda tilmaamaha iyo sharciga. Hadii laga talaaboyin sharci daro ah markasta skoolku wuxuu wargalin/ u gudbinayaa booliiska.

Hadii aan shuruudaha laraacin wuxuu skoolku ka dalban karaa in si dhakhso ah loo so celiyo qalabka dijitalka ah. Qalabkuna waa in loso celiyaa skoolka isgoo dhamaystiran oo xaalad fiican ku sugan.

Hadii aan qalabka dijitalka ah laso celin markay dhamaato mudaddii daynsashadu waxaa waajib ku ah in uu ardaygu magdhawo qalabka dijitaalka ah. Faktuurad

ayaana loo dirayaa ardayga qaan gaadhka ah ama walidka ama qofka masuulka ah.